Cusbooneysiinta Liisanka Darawalnimada - Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Q. Liisankayga darawalnimada ee Minnesota ama aqoonsigayga gobolka wuu dhacayaa laakiin ma awoodo inaan aado xafiis si aan u cusbooneysiiyo COVID-19 dartiis. Maxaan sameeyaa?

J: Waad ku cusbooneysiin kartaa ama ku beddeli kartaa liisanka darawalnimada ama Aqoonsiga gobolka onlayn halkan the.m.m.gov.

Waxaad u baahan doontaa inaad soo booqato xafiiska liisanka darawalnimada haddii aad rabto inaad u dalacdo Aqoonsiga REAL, ama inaad beddesho magacaaga ama cinwaankaaga. Waa inaad horay uga sii codsatid onlayn halkan drive.mn.gov'uguhesho kahor intaadan booqan xafiiska si waqti uuna kaaga lumin miiska oo loo xaqiijiyo dukumiintiyada lagaaga baahan yahay inaad keento xafiiska si ay u dhammaystiraan codsigooda.

Booqo qaybta goobaha ee websayd-keena si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah xafiiska kuugu dhow iyo haddii aad u baahan tahay ballan.

Ogsoonow: Badhasaabka Tim Walz wuxuu saxeexay laba xeer oo sharci ah oo kordhiyay taariikhaha dhicitaanka liisamada darawalnimada, Aqoonsiyada gobolka iyo ruqsadaha dhacaya inta u dhaxaysa 13-ka Maarso, 2020 iyo Janaayo 31, 2021. Kaararkaasi waxay dhacayaan 31-ka Maarso, 2021. DPS-DVS ayaa u diraya xusuusin cusboonaysiin kuwa haysta kaarka ay saamaysay.

S: Miyay tahay inaan helo liisanka darawalnimada ama Aqoonsiga gobolka oo u hoggaansan Aqoonsiga REAL?

J: Maya. Liisanka darawalnimada ama Aqoonsiga gobolka ee u hoggaansan Aqoonsiga REAL **looguma** baahna waxyaabahan soo socda:

- Inaad liisan u haysato wadista.
- Codbixinta ama isdiiwaangelinta si aad u coddayso.
- Gelitaanka xarumaha dawladda dhexe ee aan looga baahnayn qof inuu soo bandhigo aqoonsi.
- Dalbashada ama qaadashada dheefaha dawladda dhexe.
- Helitaanka adeegyo caafimaad ama nolol-badbaadin ah (oo ay ku jiraan isbitaallada iyo xarumaha caafimaadka), fulinta sharciga ama waxqabadyada dastuurku ilaaliyo (oo ay ku jiraan marin u helidda eedaysanaha ee dacwadaha maxkamadda).
- Ka qaybqaadashada howlaha sharci fulinta ama baaritaanada.

Waxaad u baahan doontaa baasaboor, kaarka baasaboorka, Aqoonsiga REAL, liisanka darawalnimada ee la xoojiyey ama nooc kale oo la aqbali karo oo ah aqoonsi ujeeddooyin federaal ah, si aad u raacdo duulimaadyada gudaha ama aad u gasho xarumaha federaalka laga bilaabo Oktoobar 1, 2021. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Aqoonsiga REAL waxaa laga heli karaa websaydka DPS-DVS ee ah dvs.dps.mn.gov.

Dalbashada Aqoonsiga REAL waxay u baahan tahay dukumiinti dheeraad ah oo uu farayo sharciga federaalku farayo. Liiska dhamaystiran ee waraaqaha loo baahan yahay waxaa laga heli karaa dvs.dps.mn.gov.

S: Maxay Minnesota ka qabatay qorshaynta Aqoonsiga REAL?

J: Sharciga federaalka ah ee Aqoonsiga REAL waxaa soo saaray kongareeska sannadkii 2005. DPS-DVS waxay heshay oggolaansho sharci ah oo lagu bilaabayo hirgelinta Aqoonsiga REAL sannadkii 2017. Oktoobar 1, 2018, nidaam cusub oo liisanka darawalnimada ah ayaa la bilaabay kaas oo u oggolaanaya dadka reer Minnesota inay helaan liisan darawalnimo ama aqoonsi gobol oo u hoggaansan Aqoonsiga REAL. Nidaamkan cusub wuxuu la midoobayaa keydka Maamulka Amniga Bulshada, wuxuu yaraynayaa tirada diiwaannada nuqullada laba labada ah, wuxuuna aqoonsanayaa wax isdaba marinta. Nidaamkan ayaa mar kale la cusbooneysiiyay 16-kii Nofeembar, 2020 maadaama uu ka mid noqday nidaamka cusub ee Minnesota Drive (MNDRIVE).

S: Ma cusbooneysiin karo liisanka darawalnimada ama Aqoonsiga gobolka waayo macluumaadka codsigaygu uma dhigmo macluumaadka ku qoran diiwaanka DVS. Maxaan sameeyaa?

J: Waxaad ubaahantahay inaad cusbooneysiiso macluumaadka ku jira diiwaankaaga DVS si ay ula mid noqdaan macluumaadka codsigaaga. Cusbooneysiinta macluumaadkan waxay kaaga baahan doontaa inaad booqato xafiiska liisanka darawalnimada ama xarunta imtixaanka DVS. Si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah xafiiska kuugu dhow iyo haddii aad u baahan tahay ballan, booqo qaybta goobaha ee websaydkeena.

Hannaanka iyo tallaabooyinka xiga:

- Haddii macluumaadkaaga ku jira diiwaanka DVS uusan u dhigmin macluumaadka ku jira diiwaanka Maamulka Amniga Bulshada (SSA):
    - Ka sax macluumaadkaaga hay'adda aan haysan magacaaga saxda ah iyo magaca hadda ee sharciga ah iyo taariikhda dhalashada. Waxaad heli doontaa warqad ku saabsan waxa ay yihiin tallaabooyinkaaga soo socda waqtiga isku daygaaga codsiga DL.
    - Haddii magacaagu ka saxsan yahay SSA laakiin uu ka qaldan yahay DVS, waxaad u baahan doontaa inaad keento dukumiintiyo kaabaya magacaaga sharciga ah ee hadda jira si loogu oggolaado saxitaanka si ay ugu dhacdo DVS.
    - Haddii magacaaga ama taariikhda dhalashadaadu aysan ka saxnayn SSA laakiin ay ka saxsan tahay DVS, waxaad u baahan doontaa inaad kala xiriirto SSA lambarkan 1-888-847-0392 ama 1-800-772-1213, wixii caawimaad dheeraad ah.

- Haddii taariikhda dhalashadaadu ay ka qaldan tahay DVS:
    - Keen nuqul la xaqiijiyay oo ah shahaadadaada dhalasho, baasaboor Maraykan ah oo aan dhicin, ama baasaboor ajanabi ah oo aan dhicin oo ay la socdaan dukumiinti sharciyeed oo ku saabsan DVS si loo saxo taariikhda dhalashadaada.

    - Haddii aad ku dhalatay Minnesota, waxaad ka heli kartaa nuqul ka mid ah shahaadada dhalashadaada Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH). Booqo websaydka MDH ee ah https://www.health.state.mn.us/people/vitalrecords/index.html.

      Waxaad sidoo kale wici kartaa MDH 651-201-5000. Turjubaano ayaa la heli karaa.

    - Haddii aadan ku dhalan Minnesota, waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto waaxda diiwaangelinta ee gobolka aad ku dhalatay.

    - Haddii aad u baahan tahay inaad jadiidiso ama cusbooneysiiso baasaboorkaaga Maraykanka eeg websaydka hoose si aad u hesho macluumaad dheeraad ah https://travel.state.gov/content/travel/en/passports/have-passport/renew.html

- Haddii magacaaga sharci ee hadda uusan u dhigmin macluumaadka ku jira nidaamkeenna:
    - Keen dukumiintiyo taageeraya si loo saxo magacaaga. Dukumintiyada taageeraya waxaa ku jiri kara shahaado guur oo la caddeeyay, amar furriin la caddeeyay ama nuqul sharciyeysan oo amar maxkamadeed ah oo ku saabsan magaca beddelka.

- Haddii ay jiraan arrimo kale oo sababaya in dalabkaaga aan la aqbalin waxaad ka heli doontaa warqad ay ku qoran tahay macluumaad dheeraad ah wakiilka DVS ee ku caawinaya.

S: Ka waran haddii dhibaato ka timaaddo lambarka amniga bulshada?

- Si aad u saxdo lambarka amniga bulshada (SSN), soo qaado kaarkaaga SSN waqtiga dalabkaaga. Wakiilka DVS ee ku caawinaya adiga ayaa samayn doona isbedelka oo sii wadi doona dalabkaaga.
- DVS waxay ka saari kartaa SSN diiwaankaaga DVS haddii aadan hadda haysan. Waxaad u baahan doontaa inaad keento foom kale oo aqoonsi asaasi ah iyo mid labaad ah si aad u sii wadato dalabkaaga. Waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintiyada aqoonsiga ee la aqbalay websaydka DPS-DVS ee ah dvs.dps.mn.gov.

S: Ka waran haddii aanan bixin karin dukumiintiyo kaabaya sixitaanka?

J: DPS-DVS waxay ka shaqaysaa codsiyada iyadoo lagu saleynayo macluumaadka uu bixiyay codsadaha. Haddii ay ku jiraan macluumaad aan dhammaystirnayn ama khalad ah diiwaanka, liisanka darawalnimada ama Aqoonsiga la qoondeeyey waa la burin doonaa.

S: Horay ayaan dukumiintiyadan idiin siiyay, maxaan uga baahanahay inaan mar kale keeno?

J: DPS-DVS ayaa sharcigu uga baahan yahay inay sii haysato codsiyada shan sano. Nuqulo cusub ayaa loo baahan yahay haddii dukumiintiyada la soo gudbiyay in ka badan shan sano kahor.

S: Yaan la hadli karaa haddii aan u baahdo caawimaad xagga liisanka wadista ama codsiga Aqoonsiga gobolka?

J: Fadlan la xiriir DPS-DVS.

- Taleefan ahaan: (651) 297-3298
- Iimayl ahaan: dvs.driverslicenses@state.mn.us

*Adeegyada turjubaanka xaddidan ayaa la heli karaa marka la codsado. Tani waxay u baahan kartaa ballan la socosho si loo jadwaleeyo.